# Helidda caawimaad la xiriira akoonkaaga dheefaha WA Cares

Waxaad u oggolaan kartaa qof qoyskaaga ka tirsan ama wakiil in uu maamulo codsigaaga ama dheefahaaga adiga oo u diiwaangelinaya isticmaale la oggolaaday (authorized user) ahaan. WA Cares ma bixin karo lacag uu siinayo isticmaale la oggolaaday si uu daryeel ama adeegyo u gaarsiiyo qofka ka faa'iideystaha ah ee uu caawinayo.

## NOOCYADA GELIDDA

Waxaa jira laba siyaabood oo uu qofka gelid loogu oggolaan karo si uu akoonkaaga u maamulo. Isticmaalayaal la oggolaaday (authorized user) iyo wakiillada sharciga ah (legal representative) waxay labaduba kaa caawin karaan gudbinta codsigaaga, dib-u-eegista dokumentiyada, iyo maamulka dheefahaaga.

Isticmaalaha la oggolaaday ee caadiga ah wuxuu kaa caawin karaa waxyaabahan oo keliya haddii aad si cad ugu sheegto tilmaamaha waxa aad rabto in ay kuu qabtaan. Waxaad qof kasta u oggolaan kartaa gelidda si uu u noqdo isticmaalahaaga la oggolaaday. Haddii aad go'aansato in aadan caawimadooda u baahnayn, waxaad akoonkaaga ka saari kartaa waqti kasta.

Wakiilka sharciga ah waa nooc ka mid ah isticmaalaha la oggolaaday oo sharci ahaan loo oggol yahay in uu go'aanno kuu gaaro. Waa in ay haystaan dokumentiyo sharci ah, sida mas'uulnimo sharci ah (guardianship) ama wakiilnimo sharci (power of attorney), oo u oggolaanaysa in ay go'aanno gaaraan xitaa haddii aadan si cad u siin tilmaanta waxa aad rabto in la sameeyo. Waxay sidoo kale kuu saxiixi karaan foomamka.

# KUDDAR QOF ADIGA OO ADEEGSANAYA AKOONKAAGA

Wakiillada sharciga ah iyo isticmaalayaasha la oggolaaday waa in ay samaystaan akoonka dheefaha WA Cares oo iyaga u gaar ah. Haddii akoonkaaga dheefaha uu sameysan yahay, waxaad u isticmaali kartaa in aad ku darto qof adiga oo siinaya mid ka mid ah labada nooc ee gelidda. Waxaad u baahan doontaa magacooda, taariikhda dhalashada, iyo aqoonsiga WA Cares.

- Bogga habeynta (settings) akoonkaaga dheefaha, dhagsii taab-ka "Isticmaalaha La Oggolaaday/Authorized User" ee ku yaalla dalabka(menu) dhinaca bidix. Kadibna dhagsii linkiga "Martiqaad qofka akoonkaaga galaya/Invite someone to access your account".
- Marka aad dhagsiiso "Ku-xiga/Next", waxaad bilaabi doontaa bixinta faahfaahinta ku saabsan isticmaalahaaga la oggolaaday. Waxaa lagu weydiin doonaa haddii qofka aad u oggolaanayso uu haysto wax dokumenti sharci ah.
    - Si aad ugu dhigto wakiilka sharciga ah, dooro "Haa, mid annaga naga mid ah ayaa wuxuu haystaa dokumentiyo sharci ah." Soo geli dokumentiyadadaada, kadibna dooro nooca dokumentiga, sida mas'uulnimada sharciga ah (guardianship) ama wakiilnimada sharciga ah (power of attorney).
    - Si aad uga dhigto isticmaale la oggolaaday oo caadi ah, dooro "Maya, mid annaga naga mid ah ma haysto dokumentiyo sharci ah." Kadib waxaa lagu geyn doonnaa foomka DocuSign si aad si elektaroonig ah u saxiixdo oo aadna u dhammeystirto codsiga. Kadib waxaa lagugu celin doonnaa shaashadda guud ee akoonkaaga dheefaha, waxaadna arki doontaa xaqiijin muujinaysa in codsigaaga la diray.
- Wakiilkaaga sharciyeed ama isticmaalahaaga la oggolaaday waxay martiqaadka ku heli doonnaan akoonkooda dheefaha, kaas oo ay aqbali karaan ama diidi karaan. Waxay haystaan 30 maalmood oo ay kaga jawaabaan ka hor inta uusan dhicin.
- Marka ay aqbalaan, waxay maamuli karaan akoonkaaga dheefaha iyagoo adeegsanaya habeynta (settings), ama iyagoo magacaaga ka dooran kara liiska hoos-u-dhaadhaca ee ku yaalla geeska sare ee midig ee shaashadda guud ee akoonkooda.

## QOF HA KUU SAMEEYO AKOONKAAGA

Wakiil sharci ayaa sidoo kale kuu sameyn kara akoon dheefo haddii aadan mid lahayn. Marka ay sameystaan akoonkooda u gaarka ah, waxay buuxin doonnaan foom ay ku jiraan dokumentiyadooda sharciga ah iyo macluumaadka aasaasiga ah sida magacaaga sharciga ah, taariikhda dhalashada, iyo cinwaankaaga.

- Waxay ku bilaabi doonnaan sameynta akoonkooda dheefaha WA Cares.
- Marka akoonkooda la sameeyo, waxay buuxin doonnaan foom ay ku jiraan dokumentiyadooda sharciga ah iyo macluumaadka aasaasiga ah, sida magacaaga, taariikhda dhalashada, iyo cinwaankaaga.
- Xubin ka tirsan kooxda WA Cares ayaa si gacanta ah u sameyn doonta akoonka qofka ka faa'iideystaha ah, waxayna isticmaalaha la oggolaaday ku xiriirin doonnaan akoonka.
- Waxay ka maamuli karaan akoonkaaga dheefaha habeynta (settings), ama iyagoo magacaaga ka dooranaya liiska hoos-u-dhaadhaca ee ku yaalla geeska sare ee midig ee shaasahdda guud ee akoonkooda.
- Haddii aad codsanayso dheefo, waxay bilaabi karaan codsigaaga iyagoo dooranaya dheefta u codso qofka ka faa'iideysanaya ahaan.

Haddii aad u baahan tahay caawimaadda habeynta akoonkaaga laakiin aadan haysan qof haysta dokumenti sharci ah oo ku caawin kara, waad nala soo xiriiri kartaa.

## AKOONKAAGA ISTICMAALE KA SAAR

- Gudaha meesha laga habeeyo (settings) akoonkaaga dheefaha, waxaad ka saari kartaa isticmaale la oggolaaday qaybta "Kumaa geli kara akoonkaaga (Who can access your account)". Isticmaalayaasha la oggolaaday ayaa sidoo kale iska saari kara iyadoo la adeegsanaya akoonkooda dheefaha.
- Haddii aad rabto in aad ka saarto wakiil sharci ah akoonkaaga dheefaha, waxaad u baahan doontaa in aad soo gudbiso codsi rasmi ah oo lagaga saarayo. Si aad u bilowdo codsigaaga, nala soo xiriir si aad uga hesho caawimaad xubin ka tirsan kooxda WA Cares.

## XIRIIR

### TALEEFOONKA

844-CARE4WA (844-227-3492)

### EMAIL AMA WADA-SHEEKAYSI

wacaresfund.wa.gov/contact

Caawimaad luuqadeed ayaa la heli karaa. Waxaad sidoo kale geli kartaa akoonkaaga dheefaha WA Cares oo aad noogu soo diri karto farriin ammaan ah.